# XAFIISKA QARAMADDA MIDDOBAY U QAALIBLSAN KAALMAYNTA SOOMAALIYA (UNSOM)

Warsaxaafadeed degdeg ah

**WAR-SAXAAFADEED 12/2013**

## Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, Nikolas Kay, oo ka hadlay weerarkii lagu qaaday Axmed Maxamed Islaam oo jooga Kismaayo

**New York, 12 Sebtember 2013 –** Ergayga Gaarka ah ee Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya ayaa si kulul u cambaareeyay weerarkii lagu qaaday gaariga Axmed Maxamed Islaam Madoobe, oo ah Hogaamiyha Maamulka Ku-meelgaarka ah ee Jubba. Axmed Maxamed Islaam ayaa la sheegay in uu ka badbaaday weerarka culus oo lagu soo qaaday oo wax dhaawac culus ma gaarin. Hase ahaatee , waxaa weerarka ku dhintay waardiyayaashiisa iyo dad kale oo waxa aan waxba galabsan, kadid markii gaarigii Axmed Madoobe lagu dhuftay gaari kale oo laga soo buuxiyay waxyaabaha qarxa. Weerarkaasina waxaa uu ka dhacay Magaaladda dekadda leh ee Kismaayo, ee ku taalla koonfurta Soomaaliya.

Ergayga Gaarka ah wuxuu yiri: "Axmed Madoobe waa shakhsi aad muhiim ugu ah nabad ku soo dabaalidda iyo dibuheshiisiinta Soomaaliya. Waana arrin laga xumaado inay xagjirayaasha u weeraran Axmed Madoobe sida muhiimka leh ee uu uga qaybqaadanayo dhismaha qaranka iyo nabaddaba xiligan darteed". Ergayga Gaarka ah ayaa ugu baaqay dhamaan qaybaha ay arrintan khusayso inay is dejiyaan, dulqaadna muujiyaan weerarka lagu qaaday ka dib.

Ergayga Gaarka ah waxaa kale ee uu tacsi tiiraanyo leh u diray dadkii weerarkan ku waayay walaalahooda. Wuxuuna dadkii weerarka ku dhaawacmay u rajeeyay inay dhakhso u bogsoodaan.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xidhiidh Sarkaalka UNSOM u Qaabilsan Warbaahinta Ben Parker
Tel: +254 41 350 6603 • Email: unsom-spokesperson@un.org

**Fadlan eeg rugta Internet-ka:**
**www.unsom.unmissions.org**

**@UNSomalia** **facebook.com/UNSomalia**